Somali

Hagaha hoyga guriga kumeelgaarka

– dadka ayaa guri sameeya

Nina Lindfors

Hagaha qofka guriga dejiyay, qofka guriga la dejiyay iyo u dhaqdhaqaaqayaasha Shabakadda hoyga guriga

Kotimajoituksen tuki ry
La cusbooneysiiyay 2022

Nuxurka

4 Gogoldhig
5 Waxa uu hoy guriyeedku yahay
6 Mabaadiida waxqabadka
9 Arrimaha muhiimka ah ee ku saabsan hoyga guriga
12 Doorka xarunta qaabilaadda qaxootiga
14 Hoyga guriga iyo waxa uu yahay
17 Shabakadda hoyga guriga iyo ururka Kotimajoituksen tuki ry
19 Shaqada shabakadda ee heer degmo
21 Lifaaqa 1: Qoraalka heshiishka hoyga guriga
26 Lifaaqa 2: Arrimaha ugu muhiimsan ee ku saabsan habsami-socodka magangelyada iyo sharci la'aanta

Gogoldhig

Shabakadda hoyga gurigu waxay isu keentaa dadka magangelyodoonka ah iyo dadka Finland deggan. Hadafkeennu waa in magangelyo-doonka ka badan inti hore ay haddii ay doonayaan degi karaan inta lagu jiro ka baaraandegista magangelyadu guriga halkii ay xerada qaxootiga ka degi lahaayeen. Hoyga gurigu waa mid kamid ah tusaalayaasha dhifta ah ee labada gees ah oo laqabsashada horumariya, taas oo yareysa, sida aragtida wax takoorta, xoojisa noocyo badnaanta iyo sinnaanta. Shabakadda hoyga gurigu waxay ku dadaalaysaa in ay habsami-socodka hoyga guriga uga dhigto guri dejiyaha iyo la dejiyaha gurigaba mid sida ugu macquulsan u fudud una hagaagsan.

Shabakadda hoyga guriga iyo ururka taageerada ee Kotimajoituksen tuki ry waxay qabanqaabiyaan hoy guriyeedka iyagoo la shaqaynaya hawlwadeennada waddanka oo dhan iyo kuwa deegaannada. U dhaqdhaqaaqayaasha Shabakadda hoyga guriga iyo shaqaalaha ururkuba waxay taageeraaan in hoy guriyeedyo cusub ay abuurmaan iyo in dadka guryaha wax dejiya, kuwa guryaha dega iyo magangelyodoonyada kale ay ka taageeraan su'aalaha la xiriria deegaanka iyagoo u soo maraya habka wadashaqeynta shabakadda.

Hagahan waxaa loogu talaggalay gacan ka geysto waxqabadka dadka hoyga guriga dadka dejiya iyo kuwa guryaha la dejiyo, dadka ka fekerayo hoy guriyeedka iyo u dhaqdhaqaaqayaasha kale ee shabakadda.

Waxa uu hoy guriyeedku yahay

Hoya guriyeedku waa qababqaabo labo geesood ah, kaas oo labada dhinac siiya fursad nololmaalmeed oo wanaagsan islamarkaasna wax ku ool ah. Nolosha qofka magangelyodoonka ah ee Finland ka deggan hoy guri waxay ku billaabanaysaa hab fiican oo sharafka bani'aadamka qaddarinaysa. Laqabsashadu waxay degdeg noqonaysaa, marka ay hoogaystaan barashada luqada, abuuranka shabakadda caadooyinka Finnishka laba barto. U furidda uu hoy dejiyuhu u farayo gurigiisa qofka magangelyodoonka ah waxay isaga u tahay hab aad u fiican oo uu ku baranayo dad cusub islamarkaasna uu uga qaybqaadanayo heer shakhsi iyo mid bulshaba waxqabad bulsheed aad muhiim u ah.

Qofka codsanaya magangelyada caalamiga ah waxaa ugu horreyn la dejiyaa xarunta qaabilaadda, taas oo ah qayb kamid adeegyada qaabilaadda ee sharciga lagu qoray. Si kastaba ha ahaatee, macaamilku iskiis ayuu hoy u qabanqaabsan karaa inta xilliga qaabilaadda oo dhan. Haddii uu macaamilki degganyahay meel kale oo uu soo sheegay, taas oo ka baxsan xarunta qaabilaadda, tusaale ahaan hoy guri, waxaa isaga loo diiwaangelinayaa waxa loogu yeero macaamil hoy gaar ah.

Nina Lindfors

Mabaadiida waxqabadka

IKHTIYAARNIMO

Hoyga gurigu wuxuu ku salaysanyahay ikhtiyaarnimada labada dhinac. Si kastaba ha ahaatee waa muhiim, in hoy dejiayaasha iyo kuwa hoyga la dejinayaba ay ka fekeraan kahor billaabashada deegaanka hoyga sababahooda iyo waxyaabaha ay filanayaanba. Hoy dejiyuhu kama helo dejinta hoyga wax magdhow ah, qofka hoyga la dejinayna wuxuu

shaqada guriga uga qaybqaadanaaya si lamid ah dadka kale ee guriga deggan. Degista hoygu qasab kuma ahan xittaa magangelyodoonka, wuxuu doonayana wuxuu markasta dib ugu laaban karaa deegaanka xarunta qaabilaadda qaxootiga. Si kastaba ha ahaatee, waa in aa maanka lagu hayaa in aanay markasta suuragal ahayn in dib loogu laabto deegaanka isla xaruntii qaabilaadda ee horay loo deganaa, magangelyodoonkana loo diri karo si uu dego xarun qaabilaad oo kale.

LABA GEESOODNIMADA

Shabakadda hoyga gurigu ma ahan dad wax caawinaya iyo kuwa la caawinayo ee waa dadka isku garab nool. Hadafka hoyga gurigu waa nololmaalmeed daacad ah oo dhinac kasta uu qaybtiisa mas'uul ka yahay. Marka lagu jiro wadanoolaanshaha laba geesoodka ah wuxuu qofkasta tusaale ahaan mararka qaar u baahan karaa ama bixin karaa caawimaad. Si kastaba ha ahaatee hoy dejiyuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu gaaro go'aannada aasaasiga ah ee gurigiisa, kuwaas oo loo baahanyahay in laga wadahadlo lagana heshiiyo kahor billaabashada hoyga guriga, taas oo qayb ka ah ka heshiinta nidaamyada wadajirka ah ee hogya guriga.

KALSOONIDA IYO XAQA GAARNIMADA LOO LEEYAHAY

Inkastoo uu xiriirka hoy dejiyaha iyo qofka hoyga la dejiyay uu simmanyahay, waxaa wanaagsan in la xusuusto in hoy dejiyuhu uu leeyahay awoodda gurigiisa marka loo eego magangelyodoonka.

Waajib kuma ahan qofka hoyga la dejiyay in uu hoy dejiyaha u sheego meesha uu marayo habasami-socodka kiiskiisa magangelyadu, laakiin haddii uu rabo wuu u sheegi karaa. (Fiir Lifaaqa 2 Arrimaha ugu muhiimsan ee ku saabsan habsami-socodka magangelyada iyo sharci la'aanta). Haddii si wadajir ah looga heshiiyo, hoy dejiyuhu wuxuu magangelyodoonka u noqon karaa caawiye inta lagu jiro marxaladaha kala duwan ee habsocodka. Hoy dejiyaha waajib kuma ahan si kasta

ha ahaatee in uu habsami-socodka ka qaybqaato, waxaa wanaagsan in xadadka aqoonta iyo awoodaha wax lagu qaban karo la aqoonsado.

Ilaalinta baraayfadnimadu waxay quseysaa labada dinac, hoy dejiyaha iyo qofka hoyga la dejiyayna xaq uma lahan in ay tusaale ahaan oggolaan la'aan qaybiyaan sawiro ama macluumaadyada ku saabsan nolosha gaarka ah ee qofka kale. Waxaa wanaagsan in maanka lagu hayo, in magangelyodoon ahaanshuhu ay tahay macluumaad aan la faafin kafrin.

Nina Lindfors

Arrimaha muhiimka ah ee ku saabsan hoyga guriga

YAA NOQON KARA HOY DEJIYE?

Hoyga guriga waxaa bixin kara qofkasta oo gurigiisa ku haysta boos islamarkaasna doonaya in uu gurigiisa u furo dadka magangelyodoonka ah. Hoy dejiyuhu uma baahna in uu noqdo khabiir yaqaan arrimaha magangelyodoonnimada ama waayo-arag shaqada iskaa wax u qabsada ah.

SIDAN AYUU HOYGA GURIGU KU BILLOWDAA:

Hoy guriyeedyadu siyaabo kala duwan ayeey u abuurmaan. Qofka magangelyodoonka ah wuxuu u guuri karaa hoyga guriga ee qof ay horay isu yaqaaneen ama hoyga gurigu wuxuu ka dhalan karaa dadka u baahan hoy guri iyo kuwa dadka doonaya in ay hoy guri bixiyaan dhexdooda, kuwaas oo aan horay isu aqoonin. Gaar ahaan marka lagu jiro xaaladda dambe, ururka Kotimajoituksen tuki ry iyo Shabakadda hoy guriyeedka ayaa waxay door muhiim ah ku leeyihiin isu keenidda hoy bixiyaha iyo qofka hoyga la dejinayo iyo taageerada habsami-socodka hoy guriyeedka.

Haddii aad xiisaynayso in aad noqoto hoy bixiye, waxaan kugu dhiirigelinaynaa in aad la xiririto ururka Kotimajoituksen tuki ry si looga salgaaro fursadah hoyga guriga. Haddii aadan weli aqoon qof ama dad magangelyodoon ah oo aad rabi lahayd in aad siiso hoy guri, ururka ayaa kaa caawin kara helista xiriirkooda. Waxaa kale oo uu ururku gacan ka geystaa xaaladaha diyaarinta hoy guriyeedka la xiriira ee ay dhinacyada doonaya hoy guriyeedku ay habab kale isu baranayayeen, gaar ahaan marka

haddii hoy bixiyaha iyo qofka hoyga la siinayo aanay horay si fiican isugu aqoon. Markaas habsami-socodku waa sidan soo socota:

1. Buuxi foomka la soo xiriiridda ee ku jira bogaggeena shabakadda https://kotimajoitusverkosto.fi/yhteys/. Waxaa sheegi kartaa xaaladdaada iyo waxyaabaha aad rajaynayso su'aalo dheeraad ahna waa soo gudbin kartaa. Shaqaalaha ayaa sida ugu dhakhsaha badan kuula soo xiriiraya. Si toos ah ayaa sidoo kale shaqaalaha ula xiriiri kartaa adigoo telefoon ama iimayl u diraya. Kulanka shaqaalaha lala yeelanayo waxaa looga hadlayaa sida u shaqaynta hoy guri bixiye ahaan, bilaabista hoyga guriga, sababahaadaiyo fursadahaada bixinta hoyga guriga.

2. Haddii markan kaddib la doonayo in hoyga guriga horay loo sii wado, shaqaalaha ayaa qabanqaabinaya kulan adiga iyo magangelyodoonka u dhexeeya. Haddii uu gurigaado leeyahay boos ku filan, waxaad hoy siin kartaa dhowr maganeglyodoon ama qoys dhan. Waxaa suuragal ah in kulanka barashada looga heshiiyo billaabashada hoy guriyeedka ama habsami-socodka barashada oo wakhti dheer, wakhtigaas oo ay dhinacyadu ka fiirsan karaan in ay doonayaan billaabista hoy guriyeedka iyo in kale. Waxaa halkan ku jiri karaa kulamo dheeraad ah, guriga oo barasho lagu tago, booqashooyinka dhammaadka todobaadyada lagu tago guriga ama wax lamid ah. Waa muhiim in labada dhinac ay hubaan in ay doonayaan hoy guriyeedka kahor inta aanu hoyga guriga billaaban.

3. Ku heshiinta hoyga guriga
Haddii kulanka/barashada kaddib ay labada dhinac doonayaa in ay wada-degaan, magangelyodoonku wuxuu u soo guuri karaa hoy bixiyaha. Haddii qofka hoyga degaya uu shaqaalaha ka codsado, waxay shaqaaluhu ka caawin karaa dan ka qabsashada xarunta qaabilaadda qaxootiga iyo ka heshiinta hoyga guriga oo hadal ama qoraal looga

heshiinayo hoyga guriga (fiir lifaaqa 1 Qoraalka heshiishka hoyga guriga). Waxaa kale oo wanaagsan in mustaqbalka xittaa shaqaalaha lagala xiiriro arrimaha ku saabsan hoyga. Shabakadda hoyga guriga iyo ururkeeda caawiya waxay inta karaankooda ah caawimaad iyo taageero siinayaan labada dhinac ee hogya guriga. Dhinacyada hoyga gurigu iyaga ka mas'uul ka ah hoyga guriga iyo ka heshiisiintiisa.

Haddii aanu hoyga gurigu billaabay ama aanu ku billaabanayn habkan, waxaan kuu soojeedinaynaa in ka bogato agabka Shabakadda hoyga guriga, sida hagahan iyo in si fudud ula xiriirto shaqaalaha adigoo weydiinaya dhammaan su'aalaha la xiriira hoyga guriga. Dhammaan hoy bixiyayaasha iyo dadka hoyga la siinayaba waxaa si diirran loogu soo dhoweynayaa in ay ka qaybqaataan waxqabadka shabakadda.

Waxaad ku biiri kartaa kooxda Facebook ee Shabakadda hoyga guriga, taas oo ay xubno ka yihiin xoy bixiyayaasha, dadka hoyga la siiyo iyo dadka kale ee u dhaqdhaqaaqa shabakadda (Kotimajoitusta turvapaikkaa tarvitseville Finland) ama waxaad kula xiriiri kartaa iimaylka: info@kotimajoitusverkosto.fi

Doorka xarunta qaabilaadda qaxootiga

Magangelyodoonka deggan hoyga guriga wuxuu sii lahaa xaq uu leeyahay lacagta qaabilaadda qaxootiga iyo adeegyada kale ee qaabilaadda ee uu sharcigu qorayo. Sababtaas darteed, waa in uu magangelyodoonka deggan hoyga gurigu ku qornaa xarunta qaabilaadda qaxootiga. Ku qornaansha xaruntu waxay sidoo kale shardi u tahay, in habsami-socodka magangelyadu uu noqdo mid xaraysan. Adeegyada sharcigu qorayo, sida adeegyada sooshalka iyo caafimaadka waxaa ugu horreyn la qabanqaabiyaa iyadoo loo sii marayo xarunta qaabilaadda qaxootiga. Haddii xarunta qaabilaadda qaxootigu ay ku taal degmo aan ahayn tan uu ku yaal hoyga gurigu, magangelyodoonku wuxuu marka ay jirto xaalad jirro oo degdeg ah xaq u leeyahay adeegyada heeganka xarunta caafimaadka ee ugu dhow. Xaaladaha aan degdegga ahayd waxaa wax ka qabashadooda loo sii marayaa xarunta qaabilaadda qaxootiga. Magangelyodoonyada u baahan taageerada gaarka ah waxay iyaguna xaq u leeyihiin caawimaadda xirfadlayaasha oo loo soo marsiinayo xarunta qaabilaadda.

Haddii uu magangelyodoonku u guuro hoy guri oo ku yaal degmo kale, xaruntiisa qaabilaadda qaxootigu waxay noqonaysaa tan tan ugu dhow marka laga eego dhinaca juquraafi iyo isku xirka gaadiidka. Hadafku waa in u wareegista macaamishu ay ka wareegayaan xarun iyagoo u wareegaya mid kale ay noqoto mid maamulan: xarunta la tegayo waxay wargelinta macaamilkeeda u guddoomaysaa in uu yahay waxa loogu yeero u wareegista hoy guri oo gaar ah, wareegisyta waa

ay qabanqaabinaysaa, yacni waxay ku dadaalaysaa in xarunta kale ee qaabilas ay heshaa macluumaadka macaamilka ee ay u baahantahay.

Hoyga gurigu waa in uu noqdaa mid dhab ah, yaci waa in qofka degaya hoyga guriga waa in uu degganyahay cinwaanka uu xarunta qaabilaadda qaxootiga u geeyay. Waxaa kale oo muhiim ah in xiriirka u dhexeeya qofka hoyga la dejiyay iyo xaruntu uu si fiican u shaqeeyo. Waxaa laga yaabaa in tani ay u baahanto fursad haddii loo baahdo looga soo safri karo goobta hoyga guriga loona soo safri karo xarunta qaabilaadda qaxootiga. Arrimaha la xiriira hoyga guriga (tusaale u wareegista hoy guri oo gaar ah iyo u wareegista xarun kale oo qaabilaadda qaxootiga ah oo arrintan la xiriirta), habsami-socodka magangelyodoonka iyo waxyaabaha kale ee laga welwelsanaan karo waxaa wanaagsan in lagala xiriiro sooshalladda xarunta qaabilaadda qaxootiga. Haddii uu magangelyodoonku doonayo, shaqaalaha ururku ayaa hab kale uga caawin kara wadashaqeynta.

Hoyga guriga iyo waxa uu yahay

Waxaa wanaagsan in hoy bixiyuhu uu ka fekero, inta uu gaarayo wakhtiga uu qawlqaadi karo hoy siinta, arrintan nafteeddana waxaa wanaagsan in laga heshiiyo. Waxaa wanaagsan in hoyga guriga la siiyo xilliga uu socdo habsami-socodka magangelyada oo dhan. Si kastaba ha ahaatee labada dhinacba waxay wakhti kasta xaq u leeyihiin in ay ka baxaan heshiiska hoyga guriga. Waxaa wanaagsan in la xusuusto, in booska xarunta qaabilaadda qaxootiga ee magangelyodoonka u soo bixaysa ay ku xirantahay xaaladda habsami-socodka magangelyada iyo awoodda waxqabadka. Gaar ahaan degmooyinka waaweyn lagama helo boosas la dego, magangelyodoonkana waxaa loo wareejiyaa xarunta qaabilaadda qaxootiga ee uu boos ka bannaanyahay.

Magangelyodoonku waa in uu sidoo kale awoodaa in uu hoyga deganaado xilliyada fasaxyada ama wakhtiyada kale ee uu maqanayahay qofka hoyga dejiyay, sababatoo ah xarunta qaabilaadda qaxootigu ma siin karto dadka magangelyodoonka ah deegaan ku meelgaar ah. Waxaa kale oo loo baahanyahay wakhtiyada deegaanka ku meelgaarka ah ee horay loogu heshiiyay. Tusaale ahaan, dhammaadka todobaadyada oo wakhti lagu qaato hoy guri oo ka baxsan xarunta qaabilaadda ayaa dad badan u noqon kara bareeg ay rabaan oo ay ka gelayaan nololmaalmeedkooda caadiga ah. Wakhtiyada intaas ka badan waxaa wanaagsan in magangelyodoonnada deggan xarunta qaabilaadda qaxootigu ay horay ugala sii heshiiyaan xaruntooda qaabilaadda qaxootiga.

Shariyada guriga iyo qolalka iyo isticmaalkooda- iyo weliba shaqada gurigha waxaa wanaagsan in laga heshiiyo inta lagu jiro marxaladaha hore iyo in lagu xisaabtamo arrimaha la xiriira dhaqanka iyo diinta, kuwaas oo saamayn ku yeelan kara nololmaalmeedka wadajirka ah. Waxaaa wanaagsan in aad macluumaadyada xiriirka ee muhiimka ah, sida adeegtada kala duwan ee deegaanka ay haysato. Waxaa wanaagsan in laga wadahadlo casuumidda martida, isticmaalka mukhaadaraadka, aamusnaanta, xayawaanka guriga ee suuragalka in uu meesha ku jiro iyo arrimaha kale ee nidaamka la xiriira. Sharciyada sida wadajirka loogu heshiiyay waxaa sidoo kale laga samayn karaa heshiiska hoyga guriga oo qoraal ah. Waxaa wanaagsan in lagu xisaabtamo, in nidaamyada ay iskuddubba-dhacaan inta lagu jiro xilliga hoyga guriga, waxaana laga yaabaa in xeerarka guud dib-u-eegis lagu sameeyay- waxaana wanaagsan in taas la sameeyo iyadoo si furan looga wadahadlayo.

Qofka hoyga bixiyay iyo kan hiyga la dejiyay markasta isku luqad ma ahan, laakiin hoy siinta noocan ah xittaa waxaa laga heystaa waayo-aragnimo fiican. Rabitaanka wadahadalka, ablikeeshinnada turjumaadfda iyo gacmo- iyo-f aro ka hadalka ayaa wax badan caawiya. Shaqaalaha shabakadda ayaa iaguna isticmaala adeegga turjumaad oo khadka telefoonka ah oo loogu talaggalay taageerada loo baahanyahay, inta lagu jiro xaaladaha kala duwan ee wadahadallada hore iyo hogya guriga.

Magangelyodoonku wuxuu hogya deegaanka imaanayaa isagoo ah degane dadka kale la siman. Tan waxaa qayb ka ah tusaale ahaan qabashada qaybta uu ku leeyahay shaqada guriga ee wadajir ah. Hoy siintu waa mid ikhtiyaar ah, mana ahan in ay ku xirnaato magdhow lacageed ama shaqo qabasho dheeraad ah. Si kastaba ha ahaatee, waa suuragal in la magdhabo kharashaadka dheeraad ah ee ka dhashay deegaanka magangelyodoonka (tusaale biyaha ama korontada), laakiin arrintaas xittaa waa in horay looga sii heshhiyo. Waxaa wanaagsan

in hoys siiyuhu uu hubiyo, in ay tahay in uu mas'uulka guryaha ama qolooyin kale ku wargeliyo deganaha cusub. Waxaa kale oo wanaagsan in la hubiyo, in caymiska guriga uu shaqaynayo.

Haddii uu dakhli soo galo magangelyodoonka islamarkaasna uu awoodo in uu deegaankiisa lacag la bixiyo, hoyga guriga ee caadiga ah beddelkiisa waxaa laga fekeri karaa gelitaanka heshiiska qayb kasii kireysashada guriga.

Qofka aan ku jirin xayndaabka ammaanka Finnishka lagu xisaabiyo in uu ku jiro dadka isku-dheriga ah ee meel ku wadanool, sidaas darteed deganaanshaha ku meelgaarka ah ee uu magangelyodoonku degganyahay gurigu ma saamaynayso sida ay Keladu sheegay kaalmada ijaarka ee la siiyo dadka isku guriga deggan. Marka la xisaabinayo lacagta kaalmada nolosha, magangelyodoonka looma xisaabiyo kharash iyo dakhli ahaanba. Haddii ay soo baxaan waxyaabo aan kala caddayn oo arrintan la xiriira waxaa haddii loo baahdo lala xiriira shaqaalaha.

Hoy siiyuhu waa in uu fahmaa xaaladaha adag ee ay dadka maganagelydoonka ah ka imaanayaan, iyo in safarka ay dad badan Finland ku yimaadeen uu ahaa mid dheer oo dhib badan. Waa sababta uu qol u gaar oo ammaan ah iyo bey'ad deggan ay muhiim gaar ah u leedahay dad badan oo magangelyodoon ah. Waxaa soojeedinayaa, in qofka hoyga bixiyay, kan hoyga la siiyay iyo dhammaan dadka guriga deggan ay hubiyaan difaaca tallaaladooda.

Shabakadda hoyga guriga iyo ururka Kotimajoituksen tuki ry

Shabakadda hoyga guriga oo shaqadeeda laga billaabay dhinacyo badan oo Finland ku yaal sannadkii 2015 waa dhaqdhaqaaq bulsho, kaas oo Finnishka caadiga ah ay dadka magangelyodoonka ah ku casuumayaan in ay guryohooda la degaan halkii ay ka degi lahaayeen xarunta qaabilaadda qaxootiga. Xubnaha shabakadda hoyga gurigu waa dadka hoygooda bixiya iyo kuwa hoyga la siiyo iyo dadka arrimahan u dhaqdhaqaaqa oo u shaqeeya heer dalka oo dhan ah iyo mid deegaan.

Shabakadda hoyga gurigu waxay u shaqaysaa qaab ay iyadu isku hagto. Janaalka shaqada shabakadda udub-dhexaadka u ah waa kooxda Facebook ee magangelyodoonka hoy guri u baahan (n Kotimajoitusta turvapaikkaa tarvitseville (Finland)). Kooxdan laga hadlayo waxay sidoo kale saldhig u tahay dadka hoy guriga raadinaya iyo kuwa bixinaya.

Ururka shabakadda taageera waa ururka Kotimajoituksen tuki ry iyo guddiga maamulka iyo shaqaalaha ururka. Waxaa shaqaalaha laga xiriiri karaa dhammaan su'aalaha la xiriira deegaanka hoyga guriga iyo deegaanka gaarka ah iyo weliba nololmaalmeedka dadka magangelyodonka ah. Waxaan bixinnaa taageero, talo waxaan sidoo kale samaynaa hagitaanka adeegga ee arrimaha la xiriira hoy dejinta iyo habsami-socodka magangelyada.

MACLUUMAADYADA XIRIRIKA

Iimayl guud info@kotimajoitusverkosto.fi

XAFIISKA

Terhi Aaltonen, iskudduwaha
Telefoonka 044 244 8404 · t.aaltonen@kotimajoitusverkosto.fi
Eva Kuhlefelt, khabiirka shaqada bulshada
Telefoonka 044 239 7049 · e.kuhlefelt@kotimajoitusverkosto.fi
Telefoonka heeganka ee maalmaha shaqada, saacadda 10–12.



Nina Lindfors

Nina Lindfors

Shaqada shabakadda ee heer degmo

Thabakadda hoyga gurigu waxay ka koobantahay u dhaqdhaqaaqayaal, dadka hoyga la siiyo iyo dadka hoyga bixiya oo dhinacyo kala duwan Finland ka jooga. Kooxaha degmooyinku waxay billowgi hore ee waxqabadka Shabakadda hoyga guryaha kuwa door muhiim ah ku jiray.

Kooxaha degmooyinku waxay isu keeneen dad dad mug leh oo hoy la siinayo iyo kuwa hoy bixinayo, waxay la xiriireen xarumaha qaabilaadda qaxootiga iyo saraakiisha degmooyinka, inti hoyga guriga lagu jirayna waxay caawiyeen dhinacyada. Inta badan kooxaha degmooyinku waxay wadashaqeyn la sameeyaan ururada kale ee deegaanka ka shaqeeya waxayna qabanqaabiyaan waxqabadyo iyo munaabsado, kuwaas oo ay isku barteen dadka ka soo kala jeedo asallo kala duwan. Isgaarsiinta kooxaha degmooyinku waxay inta badan soo martaa kooxda facebook.

Haddii loo dareemo, in deegaan cayiman looga baahanyahay waxqabad heer degmo ah, qof kasta ayaa markale aasaasi kara koox deegaameed. Billaabista waxqabadka waxaa taageero looga helayaa u dhaqdhaqaaqayaasha shabakadda iyo shaqaalaha. Dadka arrintan xiisaynaya waxaa laga heli karaa tusaale ahaan ururada, machadyada iyo iyo xer-diimeedyada kala duwan.

Shabakadda hoyga gurigu waxay u shaqaysaa qaab ay iyadu isku hagayso, taas oo loola jeedo, in kooxaha deegaannadu ay waxqabadyadooda u qabanqaabin karaan qaabka iyaga la fiican, taas oo ka billaabanaysa baahida deegaanka. Si kasta ha ahaatee waa muhiim, in dhammaan u dhaqdhaqaaqayaashu ay u hoggaansamaan mabaadii'da waxqabadka ee sida wadajirka ah loo go'aamiyay, kuwaas oo ah mutadawacnimo, Laba geesoodnimo, kalsooni iyo xaqa gaarnimada loo leeyahay. Xiriirka ay kooxaha deegaannada iyo u dhaqdhaqaaqayaashu la leeyihiin shabakadda iyo ururka taageera ayaa ah mid muhiim ah, sababtoo ah su'aalo-weydiinta la xiriirta hoy guriyeedka ee degmooyinka kala duwan ayaa wax badan imaanaya tusaale ahaan facebook iyo iimaylka shaqaalaha. Marka shabakadda dhexdeeda laga ogyahay dhammaan ay u dhaqdhaqaaqayaashu ka shaqaynayaan, in badan oo xiisaynaysa hoy guriyeedka ayaa qayb ka helaya shabakadda hoyga guriga.

Shaqaaluhu waxay haystaan fursad ay ku hawlwadeennada deegaanka ka taageeri karaa tusaale ahaan qabanqaabinta dhacdooyinka, taageerada taageerada khibrad wadaagga iyo waxbarashada.

Lifaaqa 1:
Qoraalka heshiishka hoyga guriga

.....

Hoy siiyaha

Qofka hoyga la dejiyay

.....

Telefoon

Telefoon

.....

Cinwaanka hoyga deegaanka

■ Hoyga gurigu wuxuu markasta ku salaysanyahay ikhtiyaarnimada. Qofka hoyga la dejiyay ma saarna waajib shaqo. Hoy siiyaha iyo qofka hoyga la dejiyay waxay qaybsashada shaqada guriga uga heshiiyeen sidan soo socota:

.....

.....

■ Magangelyodoonku ijaar ma bixinayo. Hoy siiyaha iyo qofka hoyga la dejiyay waxay ku heshiyyeen, in sidan soo socota uu qofka hoyga la dejiyay uga qabyqaato kharashaadka deegaanka (lacagta biyaha, biilka korontada iyo wixi lamid ah):

.....

.....

■ Hoy siiyaha ma saarna waajibka daryeelka ee qofka hoyga la dejiyay. Qofka hoyga la dejiyay isaga ayaa cuntadiisa waxyaabaha uu maalinkasta u baahanyahay soo iibsanaya. Hoy siiyaha iyo qofka hoyga la dejiyay waxay taas beddelkeeda wadajir ugu heshiin karaan soo gadista, bixinta lacagta iyo karinta cuntada. Hoy siiyaha iyo qofka hoyga la dejiyay waxay sidan soo socota uga heshiiyay soo gadista cuntada iyo alaabaha maalinkasta loo baahanyahay.

.....
.....

■ Magangelyodoonka iyo hoy siiyuhu waxay ku heshiiyeen sharciyada guriga ee soo socda, kuwaas oo ay tahay in la raaco:

• Qolalka (kuwa la qaybsanayo iyo kuwa gaarka ah, xittaa qolalka lagu kaydiyo cuntooyinka iyo alaabaha nadaafadda)

.....
.....

• Isticmaalka telefishinka, kambuyuutarka iyo mashiinnada kale ee guriga, khadka internetka ee aan fiilada lahayn iwm.

.....
.....

• Cabista sigaarka, isticmaalka khamriga ama waxlaha kale ee maanka dooraya lagu isticmaalayo gurihga dhexdiisa

.....
.....

• Cuntada iyo xadaymaha la xiriira

.....
.....

• Dhaqista dharka

.....
.....

• Nadaafadda guud iyo qaybsashada shaqooyinka guriga

.....
.....

• Labisashada

.....
.....

• Martida iyo martida habeenki

.....
.....

• Aamusnaanta

.....
.....

• Daryeelka iyo barbaarinta carruurta

.....
.....

• Waajibka madhowga haddii ay wax jabeen

.....
.....

• Firaha (yaa furaha haya halkee ayaase laga helayaa furaha kaydka ah)

.....
.....

• Waxyaabo kale

.....
.....

Hoy siiyuhu wuu qofka uu hoyga dejiyay fahamsiiyay su'aalaha muhiimka ah ee ammaanka la xiriira, sida lambarada xaaladaha degdegga ah, dab-sheegaha, dab-dambiyayaasha iwm.

Hoy siiyuhu wxuu u sheegay islamarkaansa/ama tusay macluumaadyada kale ee muhiimka ah ee la xiriira guriga, aqalka iyo deganaanshadooda (tusaale koodhka albaabka lagu furo, isticmaalka hiitarka iyo mashiinnada kale ee guriga).

Hoy siiyaha iyo qofka hoyga la dejiyay waxay xaq u leeyahay arrimahooda u gaarka ah. Qaybinta sawirada ama macluumaadyada kale ee hoy siiyaha iyo qofka hoyga la dejiyay lagu qaybinayo tusaale ahaan warbaahinta bulshada horay ayaa si wadajir ah looga heshiinayaa.

Hoy siiyaha iyo qofka hoyga la dejiyay waxay burrin karaan heshiiska iyadoo aan ka dhalanayn wax ciqaab ama lacag bixin ah. Waa in dhinaca kale arrinta lagu wargeliyaa sida ugu dhakhsaha badan. Marka uu dhib soo baxo waxaan soojeedinaynaa in si fudud loola xiriira shaqaalaha ururka Kotimajoituksen tuki ry.

Shabakadda hoyga guriga ama ururka Kotimajoituksen tuki ry qayb kama ahan heshiiska.

Wakhtiga iyo goobta:

.....

Saxiixyada iyo magacyada oo qoraal ah:

.....

Hoy siiyaha Qofka hoyga la dejiyay

Lifaaqa 2:
Arrimaha ugu muhiimsan ee ku saabsan habsami-socodka magangelyada iyo sharci la'aanta

Inkastoo aanay qofka hoyga la dejiyay waajib ku ahan in uu hoy dejiyaha u sheego meesha uu marayo habasami-socodka kiiskiisa magangelyadu, haddii uu rabo wuu u sheegi karaa, haddii si wadajir ah looga heshiinaya, hoy dejiyuhu wuxuu magangelyodoonka u noqon karaa caawiye inta lagu jiro marxaladaha kala duwan ee habsocodka. Waxaa imaan kara marxalado uu qofka hoyga la dejiyay noqon karo sharo la'aan. Haddii tusaale ahaan ay go'aanka codsiga magangelyada diidmada ah ee magangelyodoonku ay keenayaa in laga saaro xarunta qaabilaadda qaxootiga, dhammaan adeegyadiisa qaabilaaddu waa ay joogsanayaan. Markaas ma helayo xittaa lacagta qaabilaadda qaxoootiga, mana haysto markaas fursad uu uga qaybqaadan karo bixinta kharashaadka wadajir ah.
Maadaama habsami-socodka magangelyada iyo marxaladihiisa iyo suuragalnimada in la noqdo sharci la'aan ay si xooggan u saamaynayaan xaaladda dadka magangelyodoonka ah ee deggan hoyga guryaha, waxaa wanaagsan in hoy siiyayaashu ay garanayaan dulucda habsami-socodka magangelyada, taas oo lagu sharraxayo qoraalka soosocda.

Habsami-socodka magangelyadu wuxuu isagoo ku xiran codsadaha qaadan karaa bilayaal badan ama sannado. Sharraxaad intan ka badan oo ku saabsan sida ay u socoto habsami-socodka magangelyada iyo ka baaraandegisteeda waxaa laga helaa tusaale ahaan bogagga Hoggaanka socdaalka ama Rugta latalinta qaxootiga.

Dadka degay hoy ay u soo mareen Shabakadda hoyga guriga waa kuwa xaraystay codsigooda magangelyodoonnimada waana

laga baaraandegayaa. Marka codsiga magangelyada la xareeyo qofka magangelyodoonka waxaa laga diiwaangeliyaa xarunta qaabilaadda qaxootiga, si xor ah ayuu Finland ugu dhex socon karaa wuxuuna go'aansan karaa meesha uu degayo, haddii uu doonayo wuxuu degi karaa meel kale oo aan xarunta qaabilaadda qaxoootiga ahayn. Waxaa isaga loo qabanqaabinayaa wareygisga magangelyada, kaas oo lagu weydiinayo sababta uu magangelyada u codsanayo. Wareysiga marka uu joogo wuxuu xaq u leeyahay in uu helo qareen. Wareysiga magangelyada kaddib ayuu Hoggaanka socdaalku go'aan gaarayaa. Imaatinka go'aanku wuxuu iyadoo ku xiran codsadaha qaadan karaa bilooyin badan, ama si degdeg ah ayeey lagu heli karaa. Haddii uu go'aanku yahay mid oggolaansho ah, magangelyodoonka waxaa la siiyay sharciga deganaanshaha. Qofka sharciga deganaanshaha hela waa in xarunta qaabilaadda qaxootiga loogu qabanqaabiyaa warbixin ama info ku saabsan u guurista degmada.

Haddii uu go'aanku yahay diidmo ah, waxaa racfaan looga qaadan karaa maxkamadda maamulka. Inta lagu jiro xilliga ay maxkamadda maamulku ka baaraandegeyso kiiska, magangelyodoonku wuxuu inta badan xaq u leeyahay in uu Finland joogo, wuxuuna sidoo kale sii haysanayaa xaqa uu u leeyahay in uu shaqaysto. Ka baaraandegista kiisku wuxuu qaadan bilooyin badan ama degdeg ayuu go'aanku ku imaan karaa. Haddii aanay maxkamadda maamulku beddelin go'aanka Hoggaanka socdaalka, magangelyodoonka waxaa laga celin karaa dalka, haddii aanay Maxkamadda sare aanay bixin amar mamnuucaya in go'aanka dib u celinta ah la dhaqangeliyo. Haddii aanu magangelyodoonku helin ruqsadda racfaan qaadashada, go'aanka magangelyada ee diidmada ah waa mid dhaqangelaya. Waa muhiim in magangelyodoonku uu inta hamsami-socodka kiiskiisu socdo haysto xiririka qareenkiisa. Kahor inta go'aanka Hoggaanka socdaalka, waxaa ugu horreyn talabixinta iyo caawimaadda arrimaha sharciga laga helayaa xafiiska caawimaadda arrimaha sharciga. Haddii uu go'aanku yahay diidmo, magangelyodoonku wuxuu xaq u leeyahay in uu iskiis u xusho qareenka uu doonayo.

Haddii uu qofka magangelyodoonka haysto go'aan diidmo ah oo la dhaqangelin karo, laakiin si kastaba ha ahaatee aanay saraakiisha dowladdu isaga dalka ka saari karin, adeegyadiisa qaabilaadda qaxootiga waa la joojin karaa. Marka laga hadlayo dadka magangelyodoonka ah waxaa xaaladda loogu yeeraa inta badan sharci la'aan cusub, taas oo billaabanaysa marka xaruntа qaabilaadda ka baxo kaddib marka laga joojiyay taageerada ay xaruntu siinaysay.

Saraakiisha dowladda ayaa ka mas'uul ah caawinta dadka sharci la'aanta ah. Tani waxay ku salaysantahay dastuurka iyo sharciga daryeelka bulshada. Degmada ayaa ugu horreyn mas'uul ka ah siinta kaalmada nolosha iyo daryeelka caafimaadka ee aan laga maarmin, waxaana kaalmooyinkaas kujira hoy wakhti gaaban ah, cunto, daawooyinka lagama maarmaanka ah iyo daryeelka caafimaadka ee degdegga ah. Cunugga sharci la'aanta ku nool wuxuu xaq u leeyahay waxbarashada aasaasiga ah oo lacag la'aan ah, wuxuu xayndaabka badbaadada carruurtu ugu jiraa si lamid ah carruurta kale oo dhan. Xuquuqda cunugga sharci la'aanta ku nool waxaa taageeraya Heshiiska xuquuqda carruurta. Saraakiishu waa in markasta ay ku xisaabtamaan danta cunugga marka ay go'aan garayaan.

Finland waxaa inta badan mas'uuliyadda qaybsada degmooyinka iyo KELA, laakiin nidaamyadu waa kuwa ku kala duwan degmooyinka. Dhammaan arrimaha la xiriira sharci la'aannimada (cusub) iyo doonashada adeegyada waxaa wanaagsan in laga xiriiro shaqaalaha. Shaqaaluhu waxay bixiyaan talabixinta, taageero iyo hagitaanka adeegga la xiriira habsami-socodka magangelyada iyo sharci la'aanta.

Koti*majoitusverkosto*